

Goobta nadiifinta ee UW Mount Baker Laundry



Goobta nadiifinta ee UW Mount Baker Laundry

Faalooyinka waa la aqbalay

4 Maayo, 12:00 habeenimo. –
17 Juun, 11:59 fiidnimo, 2026

Gudbi faallooyinka

onlayn:

[go.ecology.wa.gov/
UWMountBakerLaundry-
Comments](https://go.ecology.wa.gov/UWMountBakerLaundry-Comments)

Boosto ama iimayl:

Zak Wall, Maamulaha Goobta
WA Department of Ecology
PO Box 330316
Shoreline, WA 98133-9716
Zak.Wall@ecy.wa.gov
425-758-5231

Dib u eegista dokumentiyada

[go.ecology.wa.gov/UWMount
BakerLaundry](https://go.ecology.wa.gov/UWMountBakerLaundry)

Seattle Public Library – Beacon Hill
2821 Beacon Ave S
Seattle, WA 98144
206-684-4711

Caawimaad dib u eegista
dokumentiyada:

Augie Nuszer,
Khabiirka Wacyi-gelinta
Augie.Nuszer@ecy.wa.gov
425-533-5537

Macluumaadka goobta

Aqoonsiga Goobta Xarunta:
19911937
Aqoonsiga Nadiifinta Goobta:
17017

Dhukumiintiga aya diyaar u ah fikradaha iyo faalooyinka dadweynaha

Waxaan kugu casuumeynaa inaad faallo ka bixiso dokumentiyada ku saabsan nadiifinta goobta University of Washington Mount Baker Laundry ee Seattle. Hawlihii hore ee ka dhacay goobta ayaa sababay wasakhaw saliid iyo rasaas ah oo ku jira ciidda. El Centro de la Raza iyo Mercy Housing Northwest ayaa iska kaashanaya nadiifinta ka hor dib u horumarinta goobta si loogu beddelo guryo qoysas awoodi karaan.

Dokumentiyada soo socda ayaa diyaar u ah dib u eegis:

- **Baaritaanka sixitaanka iyo daraasadda suurtagalnimada (Remedial investigation and feasibility study, RI/FS):** waxay sharxaysaa wasakhawga iyo fursadaha kala duwan ee nadiifinta.
- **Qorshaha ficilka nadiifinta (Cleanup Action Plan, CAP):** wuxuu sharxayaa waxa la qaban doono si loo nadiifiyo wasakhawga goobtan. Waxa ku jira jadwal waqtiyeed.
- **Heshiiska oggolaanshaha iibsadaha mustaqbalka (Prospective Purchaser Consent Decree, PPCD):** Heshiis sharci ah oo ku qasbaya El Centro iyo Mercy inay nadiifiyaan goobta isla markaana ka ilaalinaya mas'uuliyadda wasakhawgii hore.
- **Qorshaha ka qaybgalka dadweynaha (Public Participation Plan, PPP):** dokumenti sharxaya sida dadku uga qayb qaadan karaan habka nadiifinta.
- **Sharciga Siyaasadda Deegaanka ee Gobolka (State Environmental Policy Act, SEPA) – Go'aaminta Aan Muhiim Ahayn:** Go'aankeena ah in shaqada nadiifinta aysan u badanayn inay waxyeello u geysato deegaanka.

Ka qayb gal kulankeena furan si toos ah!

Ecology waxay qaban doontaa kulan furan oo si toos ah, iyadoo tarjumaad laga heli karo luqado badan.

Khamiis, 14 Maayo 2026

5:00–7:00 fiidnimo.

Allen Family Center

3190 Martin Luther King Jr Way S, Seattle WA 98144



Sawir si aad u hesho
macluumaad dheeraad ah

Macluumaadka adeegyada luqadda, bogga 4 - 中文 | Español | Tiếng Việt | Soomali

Goobta iyo taariikhdeeda

Goobtu waxay ku taal Seattle’s Rainier Valley, agagaarka saldhigga tareenka fudud ee Mount Baker (Mount Baker light rail station). Goobta waxaa iska leh City of Seattle, waxayna hadda ka kooban tahay meel baabuurta la dhigto, sagxad shub ah, iyo hal dhisme oo madhan. Goobtan waxaa loo isticmaalay ujeedooyin kala duwan qarnigii la soo dhaafay. Guri la dhisay qiyaastii 1916 ayaa la qaaday bartamihii 1900-meeyadii. Goob bowling ah ayaa ka shaqaynaysay halkan laga bilaabo 1950-meeyadii ilaa horraantii 1980-meeyadii, kadibna University of Washington ayaa u isticmaashay dhismaha xarun weyn oo dhar dhaqid ah ilaa 2009. Dhisme kale oo goobta ku yaallay ayaa hore u hoy u ahaa dukaamo cunto iyo ganacsiyo tafaariiq ah, ka hor inta aan la dumin 2025 si loogu diyaariyo dib u horumarin.



Sawirka 1: Khariidadda goobta ee Seattle (2901 27th Ave South)

El Centro iyo Mercy Housing ayaa iska kaashaday dib u horumarinta goobtan si ay uga dhigaan mashruuc bulshada diiradda saaraya. El Centro iyo Mercy Housing labaduba waa Ururro ku saleysan Washington oo leh taariikh dheer oo bixinta guryo la awoodi karo iyo adeegyo bulsho. Si wadajir ah, waxay qorsheynayaan inay dhisaan horumar guryo qoysas awoodi karaan oo isku dhafan, kaas oo sidoo kale ka koobnaan doona meel bulsho iyo xarunta waxbarashada hore ee University of Washington ee Rainier Valley (University of Washington’s Rainier Valley Early Learning Campus). Mashruucu wuxuu helay deeq nadiifinta guryaha la awoodi karo oo ka timid Ecology si loo taageero nadiifinta ka hor dib-u-horumarinta, El Centro iyo Mercy Housing waxay qorsheynayaan inay ka kireystaan hantidan magaalada kadibna nadiifiyaan. Wajiga koowaad ee dhismaha waxaa la filayaa inuu bilaabmo 2026. Nadiifinta iyo dib u horumarintu waxay dhici doonaan isku mar. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan mashruuca dib-u-horumarinta, fadlan booqo: <https://www.elcentrodelaraza.org/mtbaker>.

Baariitaanka sixitaanka: barashada wasakhowga goobta

Baariitaanka sixitaanka waa marxalad ka mid ah habka nadiifinta oo lagu daraaseeyo noocyada iyo meelaha uu yaallo wasakhowgu. Hababkii hore ee goobta, oo ay ku jiraan buuxinta ciidda iyo haan dhulka hoostiisa ah (Underground Storage Tank, UST), ayaa sababay wasakhow ka sarreeya heerarka nadiifinta ee gobolka.

Wasakhowgu wuxuu ku jiraa ciidda. Goobtu waxay ka kooban tahay wasakhowyada walaaca leh ee soo socda:

- **Ciid:** Hydrocarbons-ka batroolka ee ku jira naaftada iyo saliidda; rasaas

Wasakhowyan waxaa laga helay heerar ka sarreeya waxa uu oggol yahay sharciga nadiifinta ee gobolka, Sharciga Xakamaynta Sunta ee Tusaalaha (Model Toxics Control Act, MTCA), waxayna u baahan yihiin tallaabooyin nadiifin.

Daraasadda suurtagalnimada: isbarbardhigga fursadaha nadiifinta

Fursadaha nadiifinta waxaa lagu qiimeeyaa sida ay u ilaaliyaan caafimaadka dadka iyo deegaanka, u hoggaansamaan sharciyada, iyo muddada ay ku dhammaan karaan.

Ecology waxay qiimeysay laba fursadood oo nadiifin ah, oo loo yaqaan alternatives, goobtan. Beddelka 1 waxay daweynaysaa wasakhowga batroolka ee dhulka hoostiisa iyadoo la adeegsanayo habab kuleyl-ku saleysan, waxayna ku tiirsan tahay hababka dabiiciga ah iyo xakamaynta hay'adaha (xeerar ama xaddidaadyo hubiya in nadiifintu sii ahaato mid wax ku ool ah isla markaana dadka aan loo bandhigin wasakhow haray). Beddelka 2 waxay ka saari doontaa UST, qodi doontaa ciidda wasakhaysan meelaha si badbaado leh loo gaari karo, waxayna adeegsan doontaa walax daaweyn ah ka hor xakamaynta hay'adaha. Labada fursadoodba waxaa si faahfaahsan loogu sharxay Daraasadda Suurtagalnimada.

Qorshaha ficilka nadiifinta: sharaxaadda fursadda nadiifinta ee la doortay

Qorshaha Ficilka Nadiifinta wuxuu sharxayaa fursadda nadiifinta ee la doortay (lagu doortay Daraasadda Suurtagalnimada). Goobtan, Ecology waxay dooratay Beddelka 2, oo ay ku jiraan:

- Ka saar UST oo god ciidda wasakhaysan ee Remedial Area 1
- Qod ciidda wasakhaysan ee la gaari karo ee Remedial Area 2, adigoo ka tagaya qayb ka mid ah ciidda haddii loo baahdo
- Adeegso walax daaweyn ah si ay u burburiso batroolka haray
- Adeegso Environmental Covenant si looga hortago soo-gaadhista loona hago isticmaalka mustaqbalka ee dhulka iyo adeegyada



Sawirka 2: Qorshaha Ficilka Nadiifinta ee goobta, iyadoo Remedial Areas 1 iyo 2 lagu muujiyay casaan

Habraaca nadiifinta Ecology

[Model Toxics Control Act \(MTCA\)](https://ecology.wa.gov/mtca)¹ waa sharciga nadiifinta deegaanka ee Washington. Waxay bixisaa shuruudaha nadiifinta goobta wasakhaysan waxayna dejisaa heerar ilaalinaya caafimaadka aadanaha iyo deegaanka. Ecology ayaa mas'uul ka ah fulinta MTCA, oo ay ku jirto kormeerka ama maareynta nadiifinta. [Habka nadiifinta MTCA \(MTCA cleanup process\)](https://ecology.wa.gov/mtca-process)² waxaa lagu dhammaystiraa tallaabooyin (eeg Jaantuska 3, hoos) muddo kala duwan. Goobta nadiifinta UW Mount Baker Laundry waxay hadda ku jirtaa dhowr marxaladood oo habkan ah. Dhammaan tallaabooyinka hadda jira waxaa hoos lagu muujiyay casaan.

 Fursada fikrada dadweynaha



Sawirka 3: Habraaca rasmiga ah ee nadiifinta Washington

Cusboonaysiinta tooska ah ee goobta

Waxaad iska diiwaan gelin kartaa [bog](https://ecology.wa.gov/bog).³ Waxaad heli doontaa iimayl toddobaadle ah haddii aan beddelno xaaladda goobta, ku darno dukumentiyada bogga, ama furno muddada faallooyinka.

Adeegyada luuqada

Waxaan bixinaa adeegyo turjumaad iyo fasiraad bilaash ah. Si aad u codsato, iimayl u dir Augie.Nuszer@ecy.wa.gov ama wac 425-533-5537. Haddii aad wacdo, codso turjubaan si lagu xiro mid.

中文: 本材料有中文版本。如需查看，

请访问 www.go.ecology.wa.gov/UWMountBakerLaundry。

Tiếng Việt: Tài liệu này có sẵn bằng tiếng Việt. Để xem bản sao, vui lòng truy cập

www.go.ecology.wa.gov/UWMountBakerLaundry.

Español: Este material está disponible en español. Para ver una copia,

visite www.go.ecology.wa.gov/UWMountBakerLaundry.

Soomalii: Qoraalkan waxa lagu heli karaa Somali. Si aad u aragto nuqul, booqo

www.go.ecology.wa.gov/UWMountBakerLaundry.

¹ <https://ecology.wa.gov/mtca>

² <https://ecology.wa.gov/mtca-process>

³ www.go.ecology.wa.gov/UWMountBakerLaundry

Toxics Cleanup Program
PO Box 330316
Shoreline, WA 98133-9716

Goobta nadiifinta ee UW Mount Baker Laundry

Dukumeentiyada nadiifinta oo diyaar u ah dib u eegis

中文 | Español | Tiếng Việt | Soomali

Mudada faalo ka dhiibashada dadweynaga:

4 Maayo, 12:00 habeenimo – 17 Juun,
11:59 fiidnimo, 2026

Kulan furan: si toos ah loo imaado!

Khamiis, 14 Maayo; 5:00–7:00 galabnimo.
Faahfaahinta ka eeg bogga koowaad.

Waraqaha la xidhiidha:

go.ecology.wa.gov/UWMountBakerLaundry

Helitaanka ADA

Si aad u codsato habaynta Sharciga Maraykanka ee Dadka Naafada ah (Americans with Disabilities Act, ADA), kula xiriir Ecology talefoon ahaan lambarka 425-533-5537 ama iimaylka Augie.Nuszer@ecy.wa.gov, ama booqo ecology.wa.gov/Accessibility. Adeegyada Dadka Laxaadka La' ama TTY la hadal 711 ama 877-833-6341.



Iskaan garee si
aad xog u hesho
oo isdiiwaangeli



Goobta nadiifinta ee UW Mount Baker Laundry